# Oggolaanshaha Qiimaynta Waxbarashada Dhalaanka

Magaca Ilmaha: ____________________________________________________ Taariikhda Dhalashada: ______________
*(For office use only)*

*MARSS other ID:*______________ Parent/Guardian Name(s):__________________________________________________

Qiimaynta kobaca dhallaanka ayaa gacan ka gaysanaaya in degmada dugsigu aqoonsato carruurta ka faa'iidaysan kara ilaha degmada iyo bulshada ee la heli karo si ay u caawiyaan kobaceeda. Baaritaanka kobaca ee dhallaanka waxaa ku jira baaritaanka araga oo gacan ka gaysanaaya helitaanka ciladaha indhaha ku dhici kara, laakiin kuma haboonna baaritaanka balaaran ee isha. Baaritaankaan ma badelaayo daryeelka joogtada ah ee uu bixiyo dhakhtarkaaga caafimaadka ama dhakhtarka ilkaha. Xogta qiimaynta ee la aruusho ayaa ah mid sir ah marka waxaa keliya lala wadaagi karaa qof ku jira liiska shaacinta xogta; shaqaalaha degmada dugsiga ee baahida dhabta ah ee waxbarasho u qaba inuu ogaado; amarka maxkamada; ama kuwa kale sida uu amraayo sharcigu, ayna ku jiraan gobalka ama xisaabiyaha sharciga ah.

**A. Qiimayntaan waxaa ku jira:**

- Akhrinta diiwaanka talaalka cunugaaga
- Hubinta kobaca cunugaaga, sida jooga iyo miisaanka
- Hubi ciladaha dhagaysiga macquulka ah
- Hubinta caafimaadka indhaha, ayna ku jiraan hubinta araga cunugaaga
- Akhrinta sababaha caqabada ku noqon kara caafimaadka, kobaca, hormarka iyo waxbarashada cunugaaga
- Hubinta kobaca cunugaaga
- Warbixintaada kobaca cunugaaga iyo waxbarashada ayna ku jiraan xaalada dareenka iyo habdhaqanka
- Xog ku saabsan daryeelka caafimaadka iyo caymiska cunugaaga
- Xog ku saabsan ilaha bulshada iyo barnaamijyada oo lagu saleeyay baahiyaha cunugaaga ama qoyska

**B. Haddii baaritaankaan uu yahay Baaritaanka Ilmaha iyo Kurayda (Child and Teen Checkup), Head Start, ama baaritaan u dhigma waxaa ku jiri kara:**

- Hubinta caafimaadka hadda, waagii hore ee cunugaaga, ama caafimaadka xubnaha kale ee qoyska
- Hubinta cadaadiska dhiiga cunugaaga
- Baaritaanka jirka madaxa ilaa jirka
- Hubinta ilkaha cunugaaga, ciridka, iyo afka
- Hubinta khatarta qaaxada
- Baaritaanka dhiiga ee dhiig la'aanta
- Baaritaanka dhiiga ee sunta maarta
- Nooc kale

**Xaquuqda Waalidka iyo Cunuga, Waajibaadka, iyo Xaqiijinnada**

1. Heerarka baaritaanka isku mid u ah cunug kasta ayadoon laga eegayn isirka, dakhliga, caqiiqadada, jinsiga, wadanka uu u dhashay, ama fikradaha siyaasada.
2. Baaritaan ayaa qasab u ah in cunugu galo fasalka birimada ee dugsiga dawlada ama fasalka koobaad. Waxaad sidoo kale buuxin kartaa shardigaan haddii cunugaagu ka qaybgalo baaritaanka sanadkii lasoo dhaafay ayadoo la adeegsanaayo Head Start, Baaritaanka Ilmaha iyo Kurayda, ama baaritaanka kobaca oo u dhigma oo lagu baxsho adeeg bixiye kale oo dhammaan ah qaybaha qasabka ah ee baaritaanka dhalaanka. Adigga ama adeeg bixiyahaaga ayaa u baahan doona inuu siiyo natiijooyinka kooban ee u dhigma kuwaas degmada dugsiga ee cunugaaga.
3. Baaritaanku qasab kuma ahan gelitaanka cunugaaga ee dugsiga barbaarinta ama fasalka koobaad haddii aad aad si guud u diido baaritaanka. Waa inaad keentaa bayaan qoran oo aad u keenayso degmada dugsiga cunugaaga oo qoraysa aqoonsiga diidmada duuduubka ah.
4. Waxaad xaq u leedahay inaad diido inaad ka jawaabto su'aalaha ama aad keento xog walina waxaad helaysaa qaybaha kale ee baaritaanka qasabka ah.
5. Waxaad xaq u leedahay inaad diido qiimaynta, baaritaanka, iyo daawaynta suurtagalka ah ee cunugaaga.
6. U qalmida caawimaada caafimaadka ee cunugaaga ama u qalmida caafimaad kale, waxbarasho, ama barnaamijyada adeegga bulshada saamayn ma gaarayso haddii aad diido baaritaankaan ama qaybo kamid ah baaritaankaan.

Waxaan u fasaxayaa Qiimaynta Caafimaadka iyo Kobaca Ilmaha ee hoos lagu sheeg ee:

***Magaca Cunuga:*** ______________________________________________________________________

***Mid tigsaar:***

☐***Samaynta baaritaanka lagu qeexay qaybta A ee kore***
☐***Samaynta baaritaanka lagu qeexay qaybta A iyo B***
☐***Baaritaanka kor lagu sheegay marka laga reebo:*** ______________________________________

Saxiixa Waalidka/Masuulka ______________________________ Taariikhda: _______ Xiriirka Kala dhaxeeya ilmaha ________

**Waxaa La cusboonaysiiyay Maayo, 2020**